



King County

Miisaaniyada Lasoo jeediyay 2023-2024

DEEQDA GUUD EE KING COUNTY

Deeqda Guud ee King County waxaa lagu bixiyaa kharashyada hawlahaa soo jireenka ah ee dawlada degmada, oo ay kujiraan maxkamadaha, Sheriff's Office (Xafiiska Booliska), Prosecuting Attorney's Office (Xafiiska Xeer Ilaaliyaha), Difaaca dadwaynaha, xabsiyada, doorashooyinka, iyo qiimeynada hantida. Qiyaas ahaan boqolkiiba 75 kamid ah Deeqda Guud waxa lagu kharash gareeyaa badqabka dadwaynaha, laakiin degmadu waxay leedahay taariikh dheer oo la xariirta taageerada ay ku bixiso deeqdaan caafimaadka dadweynaha iyo sidookale adeegyada bulshada . Inta badan dakhliga guud ee Deeqda waxuu ka yimaadaa hantida iyo canshuurta iibka iyo qandaraasyada lagu bixiyo adeegyada dawladaha kale.

Miisaaniyada 2023 – 2024

King County waxay isticmaashaa miisaaniyada labadii sanaba mar (laba sano ah). Miisaaniyada Lasoo jeediyay 2023-2024 ee ah \$2.3 bilyan ee kamenka ah Deeqda Guud waxaa loo dheelitiraa iyadoo la isticmaalayo ilo maalgelineed oo hal mar ah, oo ay kujiraan lacagaha gargaarka masiibada ee federaalka, oo la sameynaayo dhamaadka 2024, iyo kaydinta mushaarka maadaama ay jiraan boosas badan oo banaan marka loo eego sida caadiga ahayd.

Marka loo eego hogaanka fullinta ee Constantine, degmadu waxay ku guulaysatay kayd kharash badan oo ay ku kaydisay hawlaheeda tobankii sano ee la soo dhaafay. Tallaabooyinkaan waxaa lagu sii saleyn doonaa miisaaniyada la soo jeediyay.

- Degmadu waxay xiri doontaa mid kamid ah saddexda dhismo ee xafiiska magaalada hoose sanadka 2023 maadaama ay sii soconayaan in shaqada lagu bixiyo qaab oonleen ah. Arrintaan waxay badbaadin doontaa malaayiin doollar oo ah kharashaadka hawlgalka iyo dayactirka.
- Si lamid ah, degmadu waxay adeegsanaysaa ilo istiraatijiyadeed si loo dhimo qiimaha wax iibsiga sida taleefoonada gacanta, kiimikooyinka lagu daweeyo biyaha wasakhda ah, iyo koobiyeysaasha.

Hoos u dhac ku soo fool leh iyadoo aan wax tallaabo ah laga qaadin

Saadaasha waqtii xaadirkaan waxay muujinaysaa in **Degmadu ay soo food saartay hoos u dhaca miisaaniyada Guud la xariirta oo dhan \$80 ilaa \$100 milyan ee miisaaniyada labada sano 2025-2026.**

- Arrintaan waxaa sabab u ah xadka aan sharciga ahayn ee uu gobolku soo rogay oo ah boqolkiiba 1 kobaca dakhliga sanadlahaa ah ee cashuuraha guryaha, oo lagu daray qiimaha dhismaha cusub, oo caadiyan ah ilaa 1 boqolkiiba kale.
- Canshuurta guryaha waa isha kaliya ee laga helo dakhliga ugu badan ee Deeqda Guud iyo kharashyada degmadu aad ayay u koraan si ka dhaqso badan sababo la xariira kor u kaca sicir bararka. Arrintaan waxay keentay kharashyo badan oo ku baxaan arrimaha la xariira shaqada, shidaalka, dhismaha, iyo alaaboojin iyo adeegyo kale oo badan.

Miisaaniyada lasoo jeediyay ee fulinta Constantine waxa ay dhowrtaa kaydka boqolkiiba 7, buuxinta shuruudaha Degmada, si loogu diyaargaroobo xaaladaha degdega ah ee mustaqbal, iyo in la ilaaliyo qiimeynata amaahda AAA ee Degmada. Qiimeynata AAA, heerka ugu sarreeya ee suurtagalka ah, waxay yareynaysaa kharashka dulsaarka ah marka waax kasta uun kamid ah Degmada - xitaa kuwa ka baxsan Deeqda Guud - ay amaahdaan lacag. Qiimeynata amaahda ee hoose waxay ku dari doontaa tobanaan milyan oo doolar oo kharashyo dulsaar ah, taasoo keenaysa hoos u dhaca barnaamijiyada iyo adeegyada dadka degmada.



King County

Miisaaniyada Lasoo jeediyay 2023-2024

- Ma ahan **Suurtagal in la joogteeyo heerarka adeega jira** marka isha dakhliga ugu wayn ay korarto ilaa 2 boqolkiiba sanadkii kharashkuna uu kordho 5 boqolkiiba ama in ka badan sanad kasta.

Tallaabooyinka sharci dejinta ee gobolka waxay muhiim yihiiin ka hortaga dhimista adeegga

Sanadkaan boqolaal codsiyo ah oo ku saabsan barnaamijyada General Fund (Deeqda Guud) ee dheeraadka ah ayaa la diiday sababo la xariira dakhliga. Wax ka qabashada caqabadaha maaliyadeed ee muddada dheer waxay u baahan yihiiin isbadel ku yimaada sharciga Gobolka. Degmadu, waxay mar labaad, sii wadi doontaa isbadelada xadidka kobaca dakhliga canshuurta hantida iyo ilo dakhli oo kale oo hormarsan inta lagu jiro kulanka sharci dejinta ee 2023.

- Gobalka waxuu degmada uga baahan yahay inay bixiso adeegyada qaar, sidaas darteed hay'adaha sida Department of Public Defense (Waaxda Difaaca Dadweynaha) iyo Department of Adult and Juvenile Detention (Waaxda xabsiyada Dadka Waawayn iyo Dhalaanka) ayaa inta badan laga ilaaliya dhimista miisaaniyada.
- Arrintaan waxay la micno tahay in miisaaniyada, shaqaaleysiinta, iyo dhimista adeegyadu ay si aan isku mid ahayn ugu dhacayaan maxkamadaha, Prosecutor's Office (Xafiiska Xeer Ilaalinta), waaxaha caafimaadka dadweynaha, adeegyada bulshada, iyo wakaaladaha adeega gudaha ee taageera waaxyaha kale ee Gobolka.
- Haddii laanta sharci dejintu ku guuldareysto inay wax ka qabato, miisaaniyad dhimis aad u weyn ayaa loo baahan doonaa, oo ay kujirto baabi'inta 300 ilaa 350 shaqo.

Su'aalo ma qabtaa? La xariir kceexec@kingcounty.gov.